Itaalia

MINISTERO DELL'INTERNO

euaa EUROPEAN UNION AGENCY FOR ASYLUM

# XUQUUQDAADA IYO WAAJIBAADKAAGA SOO-DHAWEYNTA



**Macluumaadkan adiga ayaa laguugu talagalay haddii:**

- aad kayar tahay da'da 18 sano jir
- aad la imaatay mid ama labadaada waalidba
- adiga iyo qoyskaaga ayaa u sheegay masuuliyiinta inaad idinku rabtaan magan-galyo (sidoo kalena loo yaqaan magangalyada caalamiga ah) ee [...itaalia]


**Adiga iyo qoyskaaguba aad ku badqabtaan wadankan.**

SOMALI

Yurub gudaheeda, qof kasta oo ka yar 18 sano waxaa loo tixgeliyaa inuu yahay carruur, wuxuuna xaq u leeyahay in la siiyo **taageero gaar ah**.

## YAA KU CAAWIN KARA?

Inta lagu jiro joogitaankaaga dalka, xirfadlayaal badan ayaa caawin kara adiga iyo qoyskaaga, tusaale ahaan **turjumaan** ayaa idin ka caawin kara inaad ku hadashaan luuqada aad fahmaysaan. Doorkoodu waxa weeye iney si sax u turjumaan waxa aad adiga ama dadka kale dhahdaan.



## MAXAAD ADIGA IYO QOYSKAAGU HELI DOONTAAN?

Adiga iyo qoyskaagu waxaad heli doontaan noocyo kala duwan oo taageero iyo adeegyo ah intaad sugaysaan inta maamulku baadhayo codsigiinna magangelyo. Tan waxa la dhahaa **soo dhawayn**.

Ka ilmo ahaan iyo magangalyo doon ahaanba waxaad leedahay xuquuqo laakiin sidoo kale waxa jira waajibaad ku saaran oo ay tahay inaad ixtiraamto. Kuwan waxa lagu sharaxay buug-yarahan.

Haddii aanad fahmayn qaybaha buug-yarahan ama haddii aad qabto wax su'aalo ah, weydii shaqaalaha iyo waalidkaaga.

Waxaad heli doontaan macluumaad dheeraad ah maalmaha soo socda.

**Iyadoo la eegayo xaaladiina, adiga iyo qoyskaagu waxaad heli doontaan:**



- goob aad seexataan



- cunto



- agabka nadaafada gaarka ah



- dhar



- Adiga iyo qoyskaagu waxaa laga yaabaa inaad sidoo kale heshaan lacag aad u isticmaashaan kharashaadka maalinlaha ah.

# XUQUUQDA DARYEEL CAAFIMAAD

**Maamulku waxay hubin doonaan inaad heshay daryeelka caafimaad ee aad u baahan tahay.**

Shaqaaluhu waxay kuu sheegi doonaan adiga iyo qoyskaaga haddii laga yaabo inaad  raadsato baadhis caafimaad oo uu sameeyo dhakhtar ama kalkaaliye.










# WARGALI SHAQAALAHAAGA HADDII:


- aad xanuusanaysantahay, dhaawacmatay ama aad u baahan tahay gargaar caafimaad oo degdega ah
- aad tahay naafo
- lagugu xad-gudbay
- aad dareentay ama aad ka cabsanaysid qof
- aad uur leedahay ama aad u malaynayso inaad uur leedahay
- adiga ama qoyskaaga ayaa u baahan caawimo sababo kale dartood.

Haddii aad marar badan dareento murugo, cadho, cabsi, walaac, ama ay kugu adkaato hurdadu, waxaad la hadli kartaa **dhakhtarka maanka**.
Waad aamini kartaa kalkaaliyaha, dhakhtarka, dhakhtarka maanka, iyo shaqaalaha. Wax kasta oo aad sheegto lalama wadaagi doono cid kale marka laga reebo waalidkaa adigoon oggolaansho bixin. Kaliya waxa ka reeban marka noloshaada ama nolosha qof kale ay halis ku jirto.

## XUQUUQDA WAXBARASHO

Ka ilmo ahaan waxaad xaq u leedahay waxbarasho iyo inaad wax dhigato. Shaqaaluhu waxay ku sheegi doonaan hawlaha waxbarasho iyo madadaalo si ay kaaga caawiyaan inaad barato, horumariso naftaada, isla markaana saaxiibo cusub sameysato.





## XUQUUQDA SHAQO





Iyadoo ku xidhan da’daada iyo xaaladdaada, waxaa laga yaabaa in laguu oggolaado inaad shaqeyso, haddii aad rabto. Shaqaalaha ayaa kusiin doona macluumaad dheeraad ah.

## HALKEE AYAAD ADIGA IYO QOYSKAAGUBA JOOGI DOONTAAN?




Meesha aad ku degi doontaan inta maamulu baadhayaa codsigiinna magangelyo waxay ku xidhan tahay xaaladdiina.

Shaqaalaha ayaa idin soo ogeysiin doona halka aad joogi doontaan. **Adinka waxaa laga yaabaa inaad heshaan tageero iyo adeegyo kaliya marka aad degtaan goobta ay goamiyeen maamulku.**

**Marar aad u yar, waxaa dhici karta in qoysaska lagu dejiyo xarun aysan si xor ah uga bixi karin ama ugu laaban karin sida ay doonaan. Haddii aad ku sugan tihiin xaaladdan, lataliye sharci iyo shaqaaluhu way idin caawin doonaan.**
Lataliye sharci waa qof yaqaan shuruucda dalkaas, kaasoo daraasayn kara xaaladdiinna oo idin caawin kara.



**Meel kasta oo aad joogtiin tihiin, waxaad xaq u leedihiin inaad heshaan:**



- **la joog qoyskaaga**



- hel caawimaad si aad **ula xidhiidhid** xubnaha qoyskaaga **oo raadi iyaga, haddii aadan garanayn meesha ay joogaan.**

**Waxaad xaq u leedahay inaad badqabto. Qofna looma ogola inuu:**



ku cabsi galiyo



ku caayo



ku dhibaateeyo

Ha noqoto cidday doonaan, qof aad garanayso iyo mid aanad garanaynba. Haddii aad wax dhibaato ah kala kulanto waalidka ama shaqaalaha, waad hadli kartaa oo codkaaga dhiiban kartaa.

## WAA MAXAY WAAJIBAADKA ADIGA IYO QOYSKAAGU LA IDINKA RABO MARKAAD HESHAAN SOO DHAWAYN?

Waa muhiim inaad sheegto runta oo aad la shaqeyso maamulka, xitaa haddii mararka qaar ay cabsi iyo dhibaato kugu noqoto inaad sheekadaada sheegto. Shaqaaluhu way ku caawin karaan haddii ay ogyihiin xaaladaada.

Hoos waxa ah qaar kamida waajibaadka adinka iyo qoyskiinu waa inay u hogaansamaan sharciga.

- ✔ Raac xeerarka goobta aad joogi doontaan.
- ✖ Haka baxsan goobta ay maamulku idiin sheegeen inaad joogtaan.
- ✔ Raaca shuruucda dalkan, oo shaqaaluhu idiin sharixi doonaan.

## MAXAA DHACAYA HADDII ADIGA IYO QOYSKAAGU AYDIN U HOGAANSAMI WAYDAAN WAAJIBAADYADIINNA?

Haddii ay tani dhacdo, waxaad si furan ula hadli kartaan shaqaalaha oo u sharaxi kartaan xaaladiina. Maamulku waxay qiimeyn doonaan xaaladda waxayna wargelin doonaan waalidkaa haddii ay go’aansadaan inay qaadaan tallaabooyin.



Tusaale ahaan, haddii xubin qoyskaaga ah aanay la shaqeyn masuuliyiinta, **xubintaasi qoyska ah waxay heli kartaa caawimo kooban.**



Haddii xubin ka mid ah qoyskaaga uu dhaqmo si rabshad leh, **xubintaas qoyska waxaa laga yaabaa inay lumiyaan taageerada ay helayaan.** Booliska ayaa la wici karaa.

Nooca caawimada ay heli doonto wali waxay ku xidhnaan doontaa xaaladiisa iyo baahiyihiisa gaarka ah.

**Adiga iyo qoyskaaga waxaad hadda ku sugan tihiin Itaalia, kasoo ah waddan katirsan EU+. Waddamada EU+ waa:**

- 27 Dal ee Xubnaha ka ah Midowga Yurub (EU): Austria, Belgium, Bulgaria, Croatia, Cyprus, Czechia, Denmark, Estonia, Finland, France, Germany, Greece, Hungary, Italy, Latvia, Lithuania, Luxembourg, Malta, Netherlands, Poland, Portugal, Republic of Ireland, Romania, Slovakia, Slovenia, Spain, Sweden iyo
- 4 waddan oo kale: Iceland, Liechtenstein, Norway iyo Switzerland.


## XEERARKA KU SAABSAN CODSASHADA ILAALINTA CAALAMIGA AH IYO U SAFARKA WADDAMADA EU+



- Adiga iyo qoyskaagu waa inaad joogtaan Itaalia oo waa inaanad u baxsan mid kamid ah waddamada EU+.
- Haddii aad baxsataan, waxaa jiri doontaa cawaaqib xun, kuwaas oo la sharixi doono mardanbe. Tusaale ahaan, waxaad ka heli doontaan taageero yar oo soo-dhawayn ah wadanka kale.
- Xasuusnow, waa inaad ka diiwaangelisaan codsigiina magangelyo wadanka EU+ ee ugu horreeyay ee aad timaadeen, haddii maamulku aanu idiin sheegin wax kale.
- Kaliya mid kamid ah waddamadan ayaa ka masuul ah inuu baadho codsigiina magangalyo. Maamulka Itaalia ayaa idiin sheegi doona wadanka arrintan ka masuulka ah.

Waxaad ku baran doontaan habraacyadan buug-yarayaal gooni ah.

## MAXAA DHACAYA HADDII ADIGA IYO QOYSKAAGA AAD U BAXSATAAN MID KA MID AH WADDAMADA KALE?




**Gudaha [itaalia...]**

- Habraaciina magangalyo doonka waa la joojin doonaa.

**Inta aad joogtaan wadanka kale ee EU+ ah:**

- Maamulku waxay go’aansan karaan inay idinku celiyaan wadanka EU+ ee aad kasoo tagteen.

Laga bilaabo marka maamulku idinku wargeliyaan go’aanka, waxaad waayi doontaan xuquuqo qaarkood, tusaale ahaan:

- ma heli doontaan noocyo kamid ah taageerada oo
- laguuma ogolaan doono inaad shaqayso.

Nooca caawimada aad heli doontaan wali waxay ku xidhnaan doontaa xaaladihiina iyo baahiyihiina gaarka ah.

## YAA IDIN CAAWIN KARA ADIGA IYO QOYSKAAGA HADDII AYNDAAN KU QANACSANAYN GO'AANKA AY GAREEN MAAMULKU?



Waxaad caawimo weydiisan kartaan lataliyaha sharci.

Shaqaaluhu waxay sidoo kale idiin sheegi doonaan ururada aan dawliga ahayn kuwaasoo ku siin kara macluumaad iyo caawimaad.




Waxaad la xidhiidhi kartaan Hay’adda Qaxootiga Qaramada Midoobay (UNHCR) wakhti kasta. UNHCR waxay ilaalisaa dadka lagu qasbay inay ka tagaan dalkooda.

## QORAALADAYDA

Buug-yarahaan waxa loogu talagalay keliya ujeeddooyin macluumaad ah. Isagu ma abuuro xuquuq iyo waajibaad midna. Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA) ayaa soo diyaarisay qaybta ugu weyn ee qoraalkan, waxaana EUAA oo keliya u oggolaan kara in la daabaco ama wax laga beddelo buug-yarahan, taas oo loogu talagalay dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub. EUAA mas'uul kama aha saxnaanta, nuxurka, dhammaystirka, sharcinimada ama kalsoonida macluumaadka ku jira buug-yarahan ee ay ku dareen dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub ama cid kale oo mas'uul ah. EUAA iyo cid u shaqaysa toona mas'uul kama aha sida loo adeegsan karo macluumaadka ku jira buug-yarahan.

© Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada, 2025